# Dhaqtar aan anigu leeyahay ma yeelan karaa hadii aan ka yarahay 18 sanno?

Can I go to the doctor on my own if I'm under 18?

## Ma heli karaa adeegyo caafimaad oo dhanka miyirka, ilkaha iyo wax kaleba ah la'aanta ogolaanshaha waalidkay ama cida mas'uulka iga ah?

Haa, **HADII** adigu:

- aadan la noolayn waalidkaa ama cida mas'uulka kaa ah, aadna adigu maamulato xoolahaaga AMA
- aad guursatay AMA
- aad ilmo dhashay. Waa aad ogolaan kartaa (fasaxi kartaa) in adeegyada daryeelada caafimaad ah la siiyo ah ilmahaaga yar AMA
- doonayso in lagaa caawiyo uur, cudurka fanariyal (venereal disease) ama isticmaalid maandooriyeyaal, ama helida talaalka cudurka Indho-caseeyaha B (hepatitis B)

## Dhaqtarku ma u sheegi waalidkay ama qofka iga mas'uulka ah?



- Dhaqtar ama xirfadlayaasha kale ee bixiya daryeelada caafimaadku, waxa ay lilaahi u aamini qowlkaaga ku saabsan daruufahaaga, waana ay ku daaweyn karaan iyagoon helin ogolaanshaha waalidka.
- Dhaqtar ama xirfadlayaasha kale ee bixiya daryeelada caafimaadku waxa ay u sheegi waalidkaa daryeelada ay kuu fidiyaan ama daryeelada aad u baahan karto hadii ay is-tusaan inaysan amaan ahayn inay ka qariyaan akhbaartaa waalidka.
- Qaar badan oo ka mid dhaqtarada qoysku si qarsoodi ah ayey u daryeelaan ilmaha yaryar, laakiin hadii aadan hubin, waydii marka horeba.
- Hadii lagu daryeelo aadna u isticmaasho daryeelkaa kaarka caafimaadka ee waalidkaa, shirkada kaarka caymisku waxa ay u dirtaa waalidkaa ogaysiis ku saabsan adeegyada.

## Waalidkay ma arki karaan waxa ku qoran diiwaanka caafimaadkayga?

Maya, **HADII** hadii aad ogolaatay in lagu siiyo aadna heshay adeegyo daryeel caafimaad aadna:

- aadan la noolayn waalidkaa ama cida mas'uulka kaa ah, aadna adigu maamulato xoolahaaga AMA
- aad guursatay AMA
- aad ilmo dhashay AMA
- doonayso in lagaa caawiyo uur, cudurka fanariyal (venereal disease) ama isticmaalid maandooriyeyaal, ama helida talaalka cudurka Indho-caseeyaha B (hepatitis B)



## Ciddee bixisa?

- Hadii aad ogolaato in daryeel caafimaad lagu siiyo, kharashka adiga ayaa ka mas'uulk ah.
- Waa aad tagi kartaa rug caafimaad oo dowladu leedahay si aad u hesho talo qarsoodi ah iyo daaweyn. Rugahaasi inta badan waa ka raqiisan yihiin iyo/ama waxa ay u fududeeyaan ilmaha aan qaan gaarka ahayni inuu bixiyo lacagta.
- Waxa aad heli kartaa Kaarka Gargaarka Caafimaadka ee [Medical Assistance (MA)].

  Wixii macluumaad ah ka eeg bogga Medical Assistance page ee ah shabakada (website) Waaxda Adeegyada Bulshada ee MN (MN Department of Human Services). Gal shabakada: www.mn.gov/dhs.



→ Ku riix badhanka falaarta hoos u jeeda ee "How do I?" *(Sidee ayaan)* ee dhinaca kore ee bogga
→ Riix "Services" *(Qaybta)* ee hoos timaada "Apply for" *(Codso)*
→ Si aad uga codsato khadka (online): riix "Online applications for individuals and families" (Codsiga khadka ee Shakhsiyada iyo Qoysaska) ka dibna riix linkiga ApplyMN
→ Codsiga warqada ah ee la daabaco, soo buuxi ka dibna boostada soo dhig: riix "Paper applications for individuals and families"

## Ka waran hadii ay jirto xaalad degdeg ahi?

Hadii ay ku haysato xaalad degdeg oo dhan caafimaad, ilkood ama miyir ah aadna u baahan tahay caawimaad degdeg ah dhaqtari waa ku daryeeli karaa isagoon helin ogolaansho waalid.

***Xog Urursan oo ku saabsan macluumaadka sharciga MA AHA talo xagga sharciga. La tasho qareen.*** *Ha isticmaalaan xogtan urursan haddi ay 1 sano ka soo wareegtay xilligii la daabacay. Weydiiso xogtii ugu dambeysay, liiska xogta urursan, ama aad ku hesho habab kale.*

**© 2023 Minnesota Legal Services Coalition. Qoraalkan waa la sii badin karaa waxaana loo adeegsan karaa oo kaliya hab shaqsi ah iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda kale waa mid la dhawray. Ogeysiiskan waa inuu la socdaa nuqul kasta oo la sii daabaco. Dib u daabicidda, sii qeybinta, iyo in loo isticmaalo hab ganacsi ah waa mid si adag loo mamnuucay.**